# Xeerka iyo uruurinta Daynta

## Ujeedada

Xeerkan iyo Uruurinta Daynta wuxuu qeexayaa biil bixinta, qaababka daynta iyo aruurinta daynta ee qabanaaya bukaannada Shirkada Isbitaalka Children's d/b/a Boston Children's Hospital ("Isbitaalka"). Liiska farsamooyinka Isbitaalka, goobaha iyo xarumaha kale ee baxsha Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah kuwaasoo Xeerkan iyo Uruurinta Dayntu qabanaayo ayaa la heli karaa sida lagu qeexay Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta. Waxaa intaas dheer, adeegyada qaar ee Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta, sida qaabka gaarka ah loogu xusayba Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta, ayaa qabanaaya adeegyada lagu bixiyo Xarumaha Isbitaalka, ama urur Dhakhaatiireed oo Isbitaalka Xariir la leh ("Uurka") halkaasoo nidamayada taageerada maamulka iyo shaqaalaha uu bixinaayo Isbitaalku, ayna bixiyan dhakhaatiirta ururka. Siyaasaddani ma dabakhayso Boston Children's Health Solutions, Rx, LLC d/b/a Boston Children's Pharmacy ama dawooyin kasta oo uu qaybiyey Boston Children's Pharmacy.

## Bayaannada Xeerka

1. Isbitaalka iyo Mu'asasadaha waxay ku dadaalayaan inay adeegyo siiyaan carruurta u baahan daryeelka, ayadoon laga eegayn awooda dhaqaale.

2. Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta ayaa qabanaaya dhammaan Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah (sida hoos lagu qeexay) ee uu bixiyo Isbitaalku. Waxaa intaas dheer, xeerarka qaar ee ku jira Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta ayaa qabanaaya Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee ay bixiyan Ururada laguna bixiyo qaar kamid ah xarumaha Uurka. Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah kuma jiraan qaliinada ikhtiyaariga ah ee isqurxintu.

3. Isbitaalku wuxuu bixiyaa Adeegyada xaaladda deg dega ah dhammaan bukaannada, ayadoon lagu takoorayn sabab la xidhiidha isir, midab, wadanka uu qofku u dhashay, muwaadinimo, soo galootinimada, diinta, caqiidada, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga jinsiga, da'da, naafada, iyo xaalada Bukaanka Danyarta Ah (hoos ayaa lagu qeexay), waxaana qabanaaya xeerarka iyo habraacyada lagu qeexay Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta ayadoon qofna la takoorayn. Isbitaalku wuxuu mamnuucayaa talaabooyin kasta kuwaasoo ka hor

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

istaagaaya dadka inay dalbadaan Adeegyada Degdega ah, sida in laga dalbado bukaanada yaala Waaxda Xaalada degdega ah inay bixiyan qarashka kahor intaan laga daawayn Xaaladaha Caafimaad ee degdega ah ama ogolaanshaha talaabooyinka lacag qaadista kuwaasoo carqaladaynaaya bixinta daryeelka, ayadoon la kala saarin xaaladaha, Adeegyada Degdega ah.

4. Isbitaalka iyo Mu'asasadaha, si waafaqsan Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, waxay ka caawin doonaan bukaannada/Wakiilada (sida hoos lagu qeexay) hanaanka dhamaystirka codsiyada loo diro Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Dadwaynaha (hoos lagu qeexay), mar kasta ooy suuragalayso.

5. Isbitaalka iyo Mu'asasadaha waxay caawimaad dhaqaale siin karaan bukaanada buuxiya shardiga u qalmida ee lagu qeexay Xeerkooda Kaalmada Dhaqaalaha.

6. Isbitaalka iyo Mu'asasadaha waxay (a) ka dhawrsan doonaan dadaalo kasta oo ay ku aruursanayaan qarashka Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah (hoos lagu qeexay) lagana qaado bukaanada ka reeban in laga qaado talaabo looga aruurinaayo lacagta sida ku cad Xeerkan Daynta iyo Dayn Aruurinta ee Isbitaalka (b) waxay celin doonaan lacag kasta oo laga qaaday bukaanada helay Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah' iyo (c) waxayna isdhaafsan doonaan xogta caymiska bukaanada iyo u qalmidooda barnaamijyada dawlada ama Kuwa Isbitaalka.

7. Isbitaalka iyo Mu'asasadaha waxay si waafaqsan Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta iyo Xeerkooda Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, kordhinayaan qiimo dhimista ayagoo ka badanaaya kuwa lagu heli karo Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, si qof iyo xaaladiisa ah, si loo aqoonsado kiisaska gaarka ah ee dhibaatada dhaqaalaha.

# Qeexitaannada

**Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB):** Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ee Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah lagana qaado shaqsiyaadka leh caymis daboolaaya Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee noocaas ah. AGB waxaa lagu xisaabin doonaa ayadoo la adeegsanaayo "Qaabka Dib U raacida", kaasoo si faahfaahsan loogu sharaxay Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka, Qaybta ciwaankeedu yahay "Xadiyada U dagsan Qarashaadka".

**Dakhliga La xisaabin Karo:** Sida lagu qeexay Xeerarka Health Safety Net (Badqabka Dhaqaalaha Caafimaadka).

**Adeegyada U qalma**: Qarashaadka Isbitaalka ama Xarunta Caafimaadka Bulshada ee u qalma qarashka ay bixisio Health Safety Net ee waafaqsan xeerarka Health Safety Net.

**Xaalada Caafimaad ee Degdega ah:** Xaalad caafimaad, mid jireed ama mid dhimirka ah, oo astaamaheedu daliil u yihiin inay aad u daran tahay, ayna ku jiraan xanuun daran, taasoo keenaysa in haddii aan degdeg gurmad caafimaad loogu samayn qofka ay keeni karto sida uu cadeeyo qof aqoon caafimaad u leh xaalada in ay galinayso caafimaadka qofka ama qof kale khatar aad u wayn, naafo wayn oo gaarta shaqada jirkiisa ama naafada daran ee unug ka mid ah jirka ama qayb ama,

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

marka ay tahay haweeneey uur leh, sida lagu qeexay qaybta 42 USC ee 1395dd(e)(1)(B).

**Adeegyada Degdega ah:** Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la siiyo qof qaba xaalad caafimaad oo degdeg ah.

**Federal Poverty Level (FPL, Heerka Fakhriga Federaalka):**: Cabirada dakhliga ee sanad kasta ay soo saarto Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka.

**Damiintaha**: Qof ama koox dad ah, ayna ku jiraan, oo aan xadidnayn, waalidiinta bukaanka, masuuliyiinta sharciga ah iyo xubnaha kale ee qoyska, kuwaasoo qaadanaaya masuuliyada lacagta dhammaan ama qayb ahaan qarashaadka adeegyada Isbitaalka ama Ururada.

**Health Safety Net:** Barnaamij qarasheed oo lagu abuuray laguna maamulo si waafaqsan M.G.L. c.188E, Qaybta 65.

**Xeerarka Health Safety Net**: Sharciyada lagu cadeeyay 101 CMR 613.00, et. Seq.

**Qof dagan Massachusetts:** qof dagan gobalka Barwaaqa sooranka ah ee Massachusetts kaasoo buuxshay shuruudaha lagu cadeeyay 130 CMR 503.002.

**MassHealth MAGI:** Dakhliga Guud ee La balaarshay ee Wax laga badalay ee loo adeegsado go'aaminta u qalmida MassHealth, ayna ku jiraan, oo aan xadidnayn, waqtiyada waafaqsan cabirida dakhliga MAGI si loo go'aanmiyo u qalmida MassHealth.

**Dhibaatada Caafimaadka**: Nooc kamid ah U qalmida Health Safety Net oo ay heli karaan Dadka dagan Massachusetts oo ku jira heer kasta oo Dakhliga La xisaabin Karo ah kaasoo qarashaadkiisa caafimaad ahaan la ogol yahay ay ka bateen Dakhligiisa La xisaabin Karo, kan damiintihiisa ilaa heer uusan awoodin inuu bixiyo Adeegyada U qalma kaalmada, sida ku cad 101 CMR 613.05.

**Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah:** Adeegyada sida macquulka ah loo filanaayo inay ka hortagaan, baaraan, ka hortagaan kasii darista, yareeyaan, saxan, ama daaweeyaan xaalado caafimaad oo nolol khatar ku ah, keenaaya dhibaato ama xanuun, keenaaya cilad jireed ama naafo, keenaaya khatarta ama imaanshaha khatar naafo, ama keenaaya cudur ama daciifnimo.

**Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka:** Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka waxaa ku jira adeegyada (aan ugu jirin inay yihiin adeegyada ay daboolaan gunnooyinka/uqalma gunnada Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ee Bukaanka ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, ama kaasoo uu dhaqaale ahaan masuul ka yahay bukaanku uuna siinaayo bixiyaasha adeegyada noocaas ah; (b) adeegyo ku jira kuwa gunnooyinku daboolaan/u qalma caawimaada, laakiin la bixiyo kadib marka bukaanku uu dhamaystay dhammaan gunnooyinka ku jira Qorshaha Caafimaadka Shaqsiga ah ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Dadwaynaha; ama (c) adeegyo uu baxshay adeeg bixiye aan ku jirin ururka Qorshaha Caafimaadka Shaqsiga ah ama

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

Barnaamijka kaalmada Daryeelka Dadwaynaha. Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka kuma jiran Adeegyada Xaaladda deg dega ah.

**Masuuliyada Dhaqaalaha ee Bukaanka:** Dhammaan lacagaha la wadaago, caymiska la wadaago iyo lacagaha la jaro ee loo baahan yahay uuna bixinaayo bukaanka/Damiinka bukaanku sida ku cad Qorshaha Caafimaadka Shaqsiga ah ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Dadwaynaha kaasoo bukaanku uu ka diiwaan gashan yahay ama bukaanku uu u qalmo.

**Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah:** Waa caymiska adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagu bixiyo caymiska caafimaadka, qorshaha caafimaadka ama daboolid kale ama qorshe kale oo kasta oo caafimaad, fayaqab ama qorshe kale, maaliyad ama haayad loo sameeyay ujeedo ah bixinta qarashka, ama haddii kale xal u helida qarashka, adeegyada daryeelka caafimaadka oo la siiyo dadka ka diiwaan gashan gudaha ama laan hoos tagta caymiskaas, qorshahaas ama barnaamijkaas.

**Bixiyaasha Xidhiidhka la leh:** Dhakhaatiirta gaarka ah, kooxaha shaqada iyo shaqsiyaadka kale iyo shirkadaha bixiya Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah kana bixiya gudaha Isbitaalka, ayna ku jiraan xarumo kasta oo caafimaad oo isbitaalku leeyahay ama xarumo kasta oo ruqsadaha Isbitaalka hoos taga. Liiska Isbitaalka Xiriirka Isla leh ayaa la heli karaa sida lagu sharaxay Xeerkaan Daynta iyo Aruurinta Daynta.

**Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha:** Waa barnaamijyo ay abuurtay dawlada gobalka ama Federaalka si lbixiyo qarashka ama haddii kale xal loogu helo qarashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee caymiska ku jira/u qalma caawimaada ee la siiyo shaqsiyaadka buuxsha shuruudaha u qalmida barnaamijka. Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, MassHealth, Health Safety Net, caymisyada qiimaha jaban ee lagu bixiyo Sharciga Daryeelka Qiimaha Jaban, sida caymisyada ConnectorCare, Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta (Children's Health Insurance Program (CHIP), barnaamijyada kale ee Medicaid iyo Medicare.

**Maal galin Kale:** Waxaa ku jira khayraadka kale iyo ilaha maaliyada ee ay hayso, heli karto, ama uu ka faa'iidaysan karo, bukaanka/Damiinka bukaanku, kuwaasoo loo adeegsan karo bixinta qarashka daryeelka bukaanka, oo uu ku jiro ayadoon la xadidayn, ururada deeq bixiyaasha, lacagaha ay bixiyan qaraabadu, saaxiibada iyo qolyo sadexaad, iyo lacagaha haayadaha (ayna ku jiraan lacagaha lagu heli karo tabarucaada dadwaynaha iyo qaababka kale ee lamidka ah ee lacag aruurinta).

**Daryeelka Degdega ah:** Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee bixiyo Isbitaalku kadib marka xaalad caafimaad timaado, hadday tahay mid jireed ama mid dhimirka ah, taasoo leh astaamo aad u daran (oo uu ku jiro xanuun daran) kaasoo qof caafimaad yaqaana aaminsan yahay in haddii aan daryeel caafimaad oo degdeg ah la siin 24 saacadood gudahood la filaayo inay keento dhibaataynta caafimaadka qofka, naafaynta shaqooyinka jirka, ama naafaynta unug kasta oo ama qayb jir kamid ah. Adeegyada Daryeelka Degdega ah ayaa la siiyaa xaaladaha aan ahayn khatar ku ah nafta aan keenayn khatar wayn oo waxyeelo u gaysan karta caafimaadka shaqsiga. Adeegyada Daryeelka degdega ah kuma jiraan adeegyada ikhtiyaariga ah.

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

# Kala Saarida Adeegyada/Hakinta ama Diidista Adeegyada

Shaqsiyaadka ayaa iskood u imaani kara, ama waa la keeni karaa, daawaynta aan horay loosii qorshayn ee Waaxda Xaaladaha Degdega ah ee Isbitaalka, ama haddii kale waxay imaan karaan, ama la keeni karaa, Xarunta wayn ee Isbitaalka, waxayna codsan karaanbaaritaan ama daawayn loogu sameeyo wax noqon kara Xaalada Caafimaad oo Degdega ah, ama waxay codsigaas u wakiilan karaan qof u dira. Bukaan kasta oo u yimaada Adeegyada Degdega ah waa la baarayaa ayadoon laga eegayn caymiska caafimaad ee bukaanka ama awoodiisa dhaqaale, si waafaqsan Sharciga Daawaynta Xaalada Degdega ah iyo Shaqaalaha ee Federaalka (EMTALA). Kadib marka la baaro bukaan yaala Waaxda Xaaladaha Degdega ah, dhakhtarka ku daawaynaaya Waaxda Xaaladaha Degdega ah ayaa qeexaaya in adeegyadu yhiin Adeegyada Degdega ah ama Daryeel Degdeg ah (si waafaqsan qeexitaanka kor lagu sheegay), ama daryeel aan Degdeg ahayn.

Adeegyada ikhtiyaariga ah iyo adeegyada loo ballamiyo bukaanka ayaa ah Daryeel aan Degdeg ahayn, sidaas awgeedna maaha midkoodna Adeegyada Degdega ah walaa Daryeel Daryeelka Degdega ah, ayadoon laga eegayn meesha adeegga lagu baxshay. Qaybahan ayuu Isbitaalku u adeegsadaa ujeedooyinka go'aaminta xaalada degdega ah iyo daryeelka degdega ah ee caymiska daynta xumaatay sida ku cad Health Safety Net.

Isbitaalku wuxuu mamnuucayaa talaabooyin kasta oo ka hor istaagaaya dadka inay dalbadaan Adeegyada Degdega ah, sida in laga doonaayo bukaanada yaala Waaxda Xaalada degdega ah inay bixiyan qarashka kahor intaan laga daawayn Xaaladaha Caafimaad ee degdega ah ama ogolaanshaha talaabooyinka lacag qaadista kuwaasoo carqaladaynaaya bixinta daryeelka, ayadoon la kala saarin xaaladaha, Adeegyada Degdega ah.

Waxaa intaas dheer, Isbitaalku ma dib dhigi doono ama diidi doono daawaynta bukaannada yimaada qaybta Adeegyada xaaladda deg dega ah ama Daryeelka Degdega ah ama ka diiwaan gashan Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, sabab la xidhiidha kaliya dhanka dhaqaalaha. Isbitaalku wuxuu xaq u leeyahay inuu dib u dhigo ama diido bixinta Adeegyada Aan deg dega ahayn, Daryeelka aan degdega ahayn ee bukaanka, ayna ku jiraan xaaladaha marka bukaanku/Damiinku diido raacida shuruudaha ah in lacag hormaris ah la bixiyo ama uu awoodi waayo awood uu ku dhibo qarashka adeegyada si iskiis ah ama ay ka dhiibaan qolo kale, uuna diido inuu codsado ama adeegsado Caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ee uu heli karo bukaanku ama bukaanku uu u qalmo, ama uu diido inuu keeno dukumiintiyada loogu baahan yahay codsiyada noocaas ah.

# Habraacyada loo maraayo Aruurina Xogta Dhaqaalaha ee Bukaanka/Masuulka bukaanka

**A. La wareegida Xogta:** Ka hor intaan la bixin wax adeegyo daryeel caafimaad ah (marka laga reebo Adeegyada xaaladda deg dega ah iyo Daryeelka Degdega ah), Bukaanka/Damiinka waxaa laga doonayaa inuu keeno xog sax ah

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

waqtiga ku haboon taasoo ku saabsan Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama caymiska Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha iyo/ama u qalmida caymiskaas; xogta meesha uu dagan yahay; isbadalada ku yimid u qalmida caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha; iyo xogta ku saabsan lacago kasta oo laga jaraayo, qayb uu bixinaayo ama qaybta caymiska ee lagu leeyahay marka laga eego caymiska uu bukaanku helo ama masuuliyaadka kale ee lacag bixinta. Xogta faahfaahsan waxaa ku jiri kara:

1. Magaca buuxa ee bukaanka, ciwaanka, nambarka taleefanka, ciwaanka iimeelka, taariikhda dhalashada, nambarka social Security ga (hadduu haysto), caymiska hadda ee Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, xogta muwaadinimada iyo meesha uu dagan yahay, iyo ilaha dhaqaalaha ee bukaanka/Damiinka bukaanka ee loo adeegsan karo bixinta qarashka daryeelka bukaanka;
2. Magaca buuxa ee damiinka bukaanka, ciwaanka, nambarka taleefanka, ciwaanka iimeelka, taariikhda dhalashada, nambarka social Security ga (hadduu haysto), caymiska hadda ee Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, iyo ilaha dhaqaalaha ee loo adeegsan karo bixinta qarashka daryeelka bukaanka; iyo
3. Khayraadka kale ee loo isticmaali karo bixinta biilka daryeelka bukaanka; ayna ku jiraan, ayadoon xadidnayn, maaliyadaha kale, barnamaijyada kale ee caymiska, xeerarka caymiska ee gaariyaasha ama mulkiilaha guriga haddii daawayntu ku timid shil gaari, barnaamijyada magdhawga shaqaalaha, iyo xeerarka caymiska ardayda.
4. Dukumiintiyo cadayn u ah xogta kor lagu sheegay.

Marka aan xogta la bixin xogta loo baahan yahay ama cadaynta la aqbali karo ee xogta xiliga qofka la dhigay isbitaalka ama la qabtay ballanta bukaan socodka, dadaalo guulaysta ayaa la samayn doonaa si loo helo xogta loo baahan yahay ayadoo la adeegsanaayo adeegga kahor isbitaal ka bixida/adeegga isbitaalka kadib.

**B. Baraha Xog Aruurinta:** Xogta soo socota ayaa qeexaysa meelaha lagu samayn doono iskudayada macquulka ah si loosoo aruursho xogta iyo cidda soo aruurinaysa:

1. **Marka la Mudaynaayo Isbitaal Dhigsta ama Booqashada Bukaan Socodka:** Xafiiska Dhakhtarka ama xubin ka mid ah shaqaalaha Isbitaalka ee mudaynaaya adeegga ayaa codsanaaya xogta dhaqaalaha.
2. **Inta Lagu Jiro Cadaynta Xogta Bukaanka:** Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, xafiiska dhakhtarka ama shaqaalaha Isbitaalka ee cadaynaaya xogta bukaanka kahor intaan adeegga la bixin ayaa codsanaaya xogta dhaqaalaha, haddii loo baahdo.
3. **Maalinta Isbitaal Dhigista/Waqtiga Adeegga; Intuu Isbitaalka Yaalo; Marka Bukaanka laga saaro Isbitaalka; iyo Kadib Isbitaal ka saarida/Adeegga Waqtiga Isbitaal Ka bixida Kadib:** Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, Iskuduwayaasha Daryeelka Bukaanka, ama Maareeyaasha Daryeelka, hadba sidii macquul ah. Marka wax kamid ah xogta dhaqaalaha ee bukaanka/Damiinka su'aal ku jirto, bukaanka/Damiinka ayaa loo gudbin karaa Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka si loo cadeeyo xogta. Hanaankan wuxuu quseeyaa labadaba Adeegyada la mudeeyay iyo kuwa

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

degdega ah (sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah kadib adeegga ama dhigista isbitaalka, si waafaqsan shardiga ku cad EMTALA).

4. **Adeegyada Degdega ah:** Shaqaalaha diiwaangalinta Waaxda Xaalada Degdega ah ayaa waraysanayaa, qaadaaya cadaynaayana dhammaan xogta bukaanka iyo dhaqaalaha ee muhiimka ah sida ugu dhakhsaha badan ee sharciyada EMTALA fasaxayaan. Xogta aan la aruurin xiliga isbitaal dhisgista ama waqtiga adeegga ayaa lagu aruurin doonaa xidhiidho iyo waraysiyo lala samaynaayo bukaanka iyo/ama Damiinka dhammaan intuu isbitaalka yaalo, ama marka isbitaalka laga saaro haddii dhammaan iskudayada kale oo dhan fashilmaan. Haddi uu ogolaado bukaanku ama Damiinka, dad kale ayaa lala xidhiidhaayaa si loo helo xogta si loo qiimeeyo inuu bukaanku/Damiinku awoodo bixinta qarashka adeegyada la baxshay.

Waxaa intaas dheer, Bukaannada/Damiinnada ayaa bixin kara xogta ayagoo adeegsanaaya barta bukaanka ee Isbitaalka ama mid kamid ah xarumaha adeegga loo doonto ee Isbitaalka, kuwaasoo ku yaala aagag kaladuwan oo gudaha Isbitaalka ah.

**C. Cadaynta Isbitaalka ee Xogta Dhaqaalaha Bukaanka:** Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, shaqaalaha maamulka waaxda caafimaadka, ama Iskuduwayaasha Daryeelka Bukaanka ayaa samayn doonaa dadaalo macquul ah oo waxtar leh si ay u cadeeyaan xogta dhaqaalaha ee bukaanku keenay sida ugu dhakhsaha badan kadib markuu bukaanku baxshay xogta, ilaa laga gaaro waqtiga isbitaalka laga saaraayo ama la dhamaynaayo adeegga bukaan socodka. Marka adeegyada la siiyo bukaan aan caymis lahayn, Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ayaa ka fiirinaaya Barnaamijka MassHealth iyo/ama Nidaamka Xaqiijinta Xogtaee uu maamulo Xafiiska Fulinta ee Massachusetts u qaabilsan Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Massachusetts Executive Office of Health and Human Services) haddii uu bukaanku u qalmo ama gudbiyay codsiga uu ku dalbanaayo barnaamijyada MassHealth, ConnectorCare, ama Barnaamijyada Kale Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha. Haddii aan la xaqiijin karin xogta kahor waqtiga Isbitaal ka saaridfa ama waqtiga la baxshay adeegga bukaan socodka, Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ama wakiiladeeda ayaa isku dayi kara inay xogta xaqiijiyaan inta lagu jiro hanaanka biilka iyo lacag aruurinta.

Dadaalada macquulka ah ee hufan ee Isbitaalku ku xaqiijinaayo xogta bukaanka waxaa kamid ah, laakiin kuma koobna intaas, codsashada xog ku saabsan caymiska bukaanka iyo u qalmida caymiska; Hubinta kaydadka xogta caafimaadka gaarka loo leeyahay iyo kuwa dadwaynaha; xaqiijinta awooda dhaqaale ee qolo sadexaad oo la yaqaano oo lacagta dhiibaysa; u dirista dalabka qarashka dhammaan caymisyada caafimaadka ee masuulka ka ah ee la aqoonsaday, iyo raacida shuruudaha iyo amarada biilka ee caymisyada caafimaadka noocaas ah, iyo racfaan ka qaadashada codsi lasoo diray marka adeeg ay tahay inay gidigiis ama qayb ka mid ah ay dhiibto shirkada caymisku.

Isbitaalku wuxuu sidoo kale samayn doonaa dadaalo macquul ah oo caqli gal ah si loo baaro in qolada sadexaad ee qarashka bixinaysa ay masuul ka noqon karto adeegyada Isbitaalku baxshay, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna: (1) xeerka magdhawga mulkiilaha gaariga ama guriga, (2) xeerarka shilka guud ama difaaca guud ee ka hortaga dhaawaca, (3) barnaamijyada magdhawga shaqaalaha, iyo (4)

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

iyo xeerarka caymiska ardayda, iyo kuwo kale. Marka la aqoonsado gacan sadexaad oo masuul ah marka laga eego adeegyo kasta oo isbitaalku lacagtooda ka helay barnaamijka Health Safety Net, Isbitaalku wuxuu celin doonaa lacagtaas wuxuuna siin doonaa barnaamijka Health Safety Net. Isbitaalku wuxuu u sheegayaa bukaanka masuuliyada ka saaran inay u sheegaan Banaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ee ku shuqul leh isbadalo kasta oo ku yimaada dakhliga ama caymiska bukaanka.

**D. Shaacinta Xogta/Bixinta Gunnooyinka:** Bukaanka/Wakiilka waxaa laga codsan karaa inuu saxiixo inuu gunnooyinka lacagta ay bixinayaan qolada sadexaad lagu (tusaale, lacagaha ka yimaada talaabooyinka xad gudubka ah) toos loogu wareejiyo Isbitaalka si uu ugu daboolo adeegyada la baxshay, iyo ogolaansho uu ku aqbalaayo shaacnta xogta muhiimka u ah ku wareejnta gunnooynkaas isbitaalka. Ogolaanshuhu waa inuu sidoo kale cadeeyaa in bukaanka/Wakiilku uu dhaqaale ahaan masuul ka yahay qarashaadka aan lagu daboolin gunnooyinka isbitaalka lagu wareejiyay.

**E. Xaqiijinta Masuuliyada Qarashka Adeegyada aan ku jirin Kaalmada:**
Marka aan la helin ogolaansho uu doonaayo Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ee Bukaanka, Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, ama ama lacag bixiye kale oo qarashka musuul ka ah kahor intaan la bixin adeegyada, ama marka aan adeeg ku jirin caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ee Bukaanka ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, ayna ku jiraan, si aan xadidnayn, marka aan isbitaalka ama dhakhtarku qayb ka ahayn shirkad caymis oo kamid ah caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ee Bukaanka ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, bukaanka/Damiinka ayaa xaqiijinaaya in lagu wargaliyay inaan la hayn ogolaanshaha qasabka ah ama inaan la hayn caymiska adeegyada, waxaana lagu wargelinayaa masuuliyadiisa ama teeda dhaqaale ee adeegyada ugu danbayn loo aqoonsado Adeegyo aan Caymisku Daboolayn.

Haddii la go'aanmiyimar uun inta lagu jiro mudada daawaynta bukaanka in bukaanka/damiinku uusan awoodin dhiibista qarashka, bukaanka/Damiinka aan awoodin inuu bixiyo qarashaadka adegyada ayaa loo gudbin doonaa la taliyaasha dhaqaalaha ee Isbitaalka si ay uga caawiyaan aqoonsiga Qorshahe kasta oo Caafimaadka Gaarka ah ee Bukaanka ah ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynahaoo uu u qalmi karo, ama barnaamijyo kasta oo caawimaad dhaqaale iyo/ama qiimo dhimis sameeya oo uu u qalmi karo.

# Qarashka

Si guud, qarashka oo buuxa ayaa la doonayaa marka isbitaalku soo gudbiyo codsiga Biilka. Gabi ahaanba waa masuuliyad saaran bukaanka/Wakiilka inuu la socdo waqtigeedana ku bixiyo qarashka daryeelka isbitaalku baxshay ee aan wali la dhiibin, ayna ku jiraan lacago kasta oo qayb ahaan laga rabay inuu bixiyo, qaybta ugasoo aada caymiska iyo lacagaha caymisku goosto.

**A. Lacagaha Lasoo shubo/Masuuliyada Dhaqaalaha ee Bukaanka**

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

1. **Adeegyada Degdega ah:** Isbitaalku kama rabo lacag hormaris ah kahor daawaynta, ama lacagta Masuuliyad Kasta oo Dhaqaale oo saaran Bukaanka oo uu bixiyo bukaanka/Damiinku taasoo shardi u ah helitaanka Adeegyada xaaladda deg dega ah, ayadoon laga eegayn awooda dhaqaale ee bukaanka/Damiinka.
2. **Adeegyada Aaan Degdega ahayn:** Isbitaalka ayaa u baahan kara in bukaanku lacag hormaris ah ama lacagta Masuuliyad Kasta oo dhaqaale ee Bukaanku/Damiinku uu bixiyo intaan la siin adeegyada aan degdega ahayn ee bukaan jiifka ama bukaan socodka, haddiii bukaanku uusan haysan caymis caafimaad oo ku filan adeegga la siinaayo, aan ka reebanyn in laga qaado talaabooyinka qarash aruurinta, aana heshiis Qorshaha Qarash Bixin La galin Isbitaalka.
3. **Xeerarka Gaarka ah ee Bukaannada U qalma caymiska lagu bixiyo Barnaamijka Health Safety Net:** Ma jiro bukaan loo aqoonsaday inuu ahay Bukaan Dhakhliga yar oo laga qaadaayo lacag hormaris, marka laga reebo sida soo socota: (a) Bukaan loo aqoonsado Bukaan Dhakhliga yar oo laga doonaayo lacago caymiska looga jaro ayaa laga dooni karaa inuu bixiyo hormaris dhan 20% lacagta laga jari lahaa, oo dhan ilaa $500; iyo (b) Bukaan u qalma caymiska Dhibaatada Caafimaadka ayaa laga dooni karaa inuu bixiyo hormaris dhan 20% lacagta qaybta uu bixinaayo Dhibaatada Caafimaadka, oo dhan ilaa $1000. Dhammaan baaqiyada soo hara ayaa la marsiinayaa shuruudaha qorshaha qarash bixinta ee cad101 CMR 613.08.

**B. Qiima dhimista:** Qiimo dhimista lagu sameeyocadadka bukaanka laga rabo ayaan u qalmin loomana gudbin doono caawimaada Health Safety Net. Isbitaalku wuxuu bixiya qiimo dhimisyo dhan ilaa 40% qarashaadka laga qaado bukaannada aan caymiska lahayn, ayadoo ku xiran jadwalada lacag bixinta, sida ku cad Xeerka Bukaanka aan Caymiska Lahayn ee Isbitaalka. Shuruuda u qalmida iyo xeerarka kale ee qiimo dhimista bukaanka aan caymiska lahayn ayaa lagu sharaxay Xeerka Isbitaalka ee Bukaanka aan Caymiska lahayn, kaasoo ay bukaannadu ka helayaan La tliyaasha Dhaqaalaha ee Isbitaalka, iyo bogga **www.childrenshospital.org/financialassistance**.

**C. Qorshayaasha Qarash Bixinta:** Marka ay dhacdo inaan bukaan/Damiinku bixin karin qarashka Isbitaalka, marka la helo, daryeelka la siiyo bukaanka, bukaanna loo aqoonsado qof aan u qalmin Health Safety Net ama caymis kale oo quseeya oo ah Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah aqma Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, uusana u qalmin caawimaad dhaqaale sida ku cad Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka, Isbitaalka ayaa bukaanka/Damiinka siin kara qorshe lacagta uu ku bixinaayo muddo loo dheereeyay.

1. Isbitaalka ayaa siinaaya Bukaannada Dhakhliga yar iyo bukaannada u qalma Dhibaatada Caafimaadka, ee lagu leeyahay baaqiga $1,000 ama ka yar, kadib marka laga jaro lacagtii ay hormariska u baxsheen, ugu yaraan hal sano, qorshe lacag bixin bilaa dulsaar ah, uuna dhiibaayo wax aan ka badnayn $25 bishiiba. Bukaannada Dhakhliga yar iyo bukaannada u qalma Dhibaatada Caafimaadka, oo lagu leeyahay lacag ka badan $1,000, kadib lacagta hore ee hormariska ah, waxaa la siin doonaa qorshe lacag bixin laba sano ah, oon dulsaar laga qaadayn. Mararka ay yimaadaan xaalado

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

aan caadi ahayn, codsiyada qorshayaasha lacag bixinta ee ka badan laba sano ayaa la siin karaa qofka ayadoo lagu salaynaayo qof ba xaaladiisa.

2. Dhammaan bukaannada/Damiinnada, markay jiraan xaalado aan caadi ahayn, Isbitaalka ayaa siin kara qorshayaal lacag bixin oo cadadyada noocaas ah lagu daboolaayo iyo mudooyin sida ku haboon xaaladaha jira, si qof iyo xaaladiisa ah.
3. Isbitaalku si guud ma bixiyo qorshe lagu dhiibaayo lacagta caymisku goosto ee adeegyada bukaan socodka.

# Caawimaad Ku aadan Codsashada Caawimaad Dhaqaale

Isbitaalku wuxuu siin doonaa bukaannada/Damiinnada xog ku saabsan, iyo caawimaad ku aadan codsashada/u qalmida, Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha iyo iyo barnaamijyada kale ee caawimaada dhaqaalaha, ayna ku jiraan MassHealth, Connector Care, u qalmida Bukaanka Dhakhliga yar ee xeerarka Health Safety Net, iyo Barnaamijyada kale ee Medicaid, iyo sidoo kale Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka iyo Barnaamijyada Qiima dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn. Isbitaalku wuxuu samayn doonaa dadaalada macquulka ah si uu adeegyada turjumaada u siiyo bukaannada iyo Damiinnada ee aan si fiican ugu hadli karin Ingiriisiga.

Bukaannada ama Damiinadu waa inay keenaan dhammaan dukumiintiyada looga baahan yahay codsiyada noocaas ah. Isbitaalku wax door ah kuma lahan go'aaminta u qalmida Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, kuwaasoo ay gaaraan wakaaladaha masuulka ka ah bixinta barnaamijyadaas. Waa masuuliyad saaran bukaanka ama Damiinka inuu u sheego Isbitaalka dhammaan go'aanada caawimaada ee ay gaareen wakaaladahaas iyo isbadalo kasta oo ku yimid u qalmida bukaanka ee barnaamijyadaas.

**A. Ogaysiiska Dadwaynaha ee helitanaka Caawimaad dhaqaale.** Isbitaalku wuxuu soo dhajinayaa boorar sheegaaya helitaanka caawimaada dhaqaale iyo caawimaada uu bixiyo Isbitaalku si loo fududeeyo codsiga bukaanka ee Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, iyo goobaha Isbitaalka ee bukaannada iyo qoysasku ka codsan karaan caawimaada noocaas ah. Boorarkaan waxa alagusoo dhajin doonaa aagaga bukaan jiifka, bukaan socodka iyo qayabaha diiwaan galinta xaaladaha degdega ah/qorista iyo sidoo kale xafiisyada ganacsiga ee caadiyan ay adeegsadaan bukaanadu.

**B. Ogaysiiska Shaqsiga ah ee helitanaka Caawimaad dhaqaale.** Isbitaalka ayaa bixin doona, (i) inta lagu jiro diiwaan gelinta koobaad ee bukaanka loogu sameeyo Isbitaalka; (ii) dusha dhammaan dukumiintiga qarash dalbashada iyo talaabooyinka kale ee qoran ee lacag aruurinta; iyo (iii) marka Isbitaalku ogaado isbadal ku dhaca u qalmida bukaanka ee caymis caafimaad, ogaysiis gaar ah oo ku aadan helitaanka caawimaad dhaqaale iyo Adeegyada U qalma Kaalmada (sida lagu cadeeyay Xeerarka Health Safety Net) iyo Barnaamijyada kale ee Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, wuxuuna caawimaad ka siin karaa codsashada barnaamijyadaas, bukaan kasta oo doonaaya caawimaad noocaas ah.

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

**C. Helitaanka Onleenka ah ee Xeerarka Daynta iyo Aruurinta Daynta iyo Xeerarka Kale**. Bukaannada/Damiinnada ayaa heli kara koobiyada Xeerkan Daynta iyo Aruurinta Daynta, iyo Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka iyo Ururada iyo Xeerka Qiimo dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, iyo sidoo kale Xisaabaadkeeda AGB ga iyo koobiyada dukumiintiyada kale ee loo adeegsado in loo sheego bukaannada helitaanka caawimaada, oo laga helaayo **www.childrenshospital.org/financialassistance**.

# Dalabka biilka/Talaabooyinka Lacag Qaadista; Go'aaminta Daynta Xumaatay

Isbitaalku wuxuu marsiinayaa isla dadaalada dalbashada qarashka iyo aruurintiisa dhammaan kootooyinka bukaannada aan caymiska lahayn si lamid ah sida loogu sameeyo kootooyinka bukaannada kale. Koobiyada dukumiintiyada lacag dalbashada caadiga ah iyo waraaqaha aqbalaada/diidmada caawimaada dhaqaalaha ayaa la heli karaa sida lagu qeexay Xeerkaan Daynta iyo Aruurinta Daynta.

**A. Go'aaminada Adeegyada Bukaanku u Qalmo.** isbitaalku wuxuu ku dhaqmayaa xeerarka iyo tilmaamaha ay soo saartay Commonwealth of Massachusetts ee maamulka u qalmida sheegashada qarashka oo ay bixinayso Health Safety Net iyo iyo codsiyada lagusoo gudbiyay Barnaamijyada kale ee Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ee Massachusetts.

Isbitaalku wuxuu ku dhaqmayaa shuruudaha quseeya ee qarash dalbashada, ayna ku jiraan, si aan xadidnayn, sharciyada Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha (Department of Public Health) (105 CMR 130.332) ee la xidhiidha adeegyada aan qarash lahayn ee gaarka ah ama dib isbitaal u dhigsita ee Isbitaalku aaminsan yahay inay ka dhasheen Dhacdo Daran oo Lasoo Gudbin karo (SRE). Shilalka SRE ee aan ka dhicin Isbitaalka kuma jiraan go'aamintaan aan lacagta lagu qaadayn. Isbitaalku sidoo kale ma doonaayo lacag lagu qaado Adeegyada U qalma caawimaada ee la siiyo Bukaan Dhakhliga yar ama Adeegyada Caymisku Daboolo ee la siiyo dadka ka diiwaan gashan MassHealth asagoo cuskanaaya lacag ay biloowgii diiday Shirkada Caymiska ee Bukaanka Dhakhliga yar sabab la xidhiidha cilad dhanka maamulka qarashka ah oo uu Isbitaalku sameeyay.

**B. Bukaanada/Masuuliyiinta bukaanka ee Laga Reebay in Laga Aruursho Qarashka:** Isbitaalka iyo Mu'asasadaha lacag kama dalbadaan ama haddii kale kama qaadaan talaabo dayn qaadis ah oo la xidhiidha qarashka Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la siiyay bukaan kasta oo la xaqiijiyo inuu:

1. Ka diiwaan gashan MassHealth, gunnooyin ka hela Barnaamijka Gurmadka Degdega ah ee la siiyo Waayeelka, Naafada iyo Carruurta (marka laga reebo in Isbitaalku uu ka dalban karo bukaannadaas Lacagta Uu masuulka ka yahay Bukaanku ee qasabka ku ah barnaamijyadaan caawimaada). Isbitaalka ayaa lacag ka dalban kara bukaanka sheegaaya inuu katirsan yahay wax kamid ah barnaamijyadaan laakiin ku fashilma inuu keeno cadaynta ka qaybgalka noocaas; marka uu helo cadaynta lagu qanco ee noocaas ah oo ah in bukaanku uu qayb ka yahay mid ama ka badan barnaamijyadan, iyo keenista codsi saxiixan, Isbitaalku wuxuu joojinayaa shaqooyinka dayn aruurinta.
2. Ka qaybgalaha Caymiska Amaanka Caafimaadka ee Carruurta (Children’s Medical Security Plan (CMSP) oo MassHealth MAGI giisu uu u dhigmo ama ka yaryahay 400% Tilmaamaha Dakhliga ee Heerka Fakhriga Federaalka (FPL).

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

Isbitaalka ayaa lacag ka dalban kara bukaanada sheegaaya inuu katirsan yahay CMSP laakiin ku fashilma inuu keeno cadaynta ka qaybgalka noocaas; marka uu helo cadayn lagu qanco oo ka qaybgalkaas muujinaysa oo ah bukaanku ku jira CMSP, Isbitaalku wuxuu joojin doonaa shaqooyinka lacag aruurinta.

3. Bukaan Dhakhliga yar (marka laga reebo Bukaanka Dhakhliga yar ee Daryeelka Ilkaha helaaya) waxaa ka reeban in laga qaado talaabada qarash aruurinta kadib marka la siiyo Adeeg Kasta oo uu helay kaliya intii lagu jiray mudada loo aqoonsaday bukaanka inuu yahay Bukaan Dhakhliga yar (marka laga reebo lacagaha qaybta uu bixin lahaa iyo lacagaha caymisku jaranaayo ee la xidhiidha Adeegyadaas uu u Qalmo). Isbitaalku wuxuu ka dalban karaan Qarashka Adeegyada ay U qalmaan Bukaan Dhakhliga yar ee la siiyay kahor intaan la go'aamin inay yihiin Bukaan Dhakhliga yar, kaliya kadib marka aqoonsigaan Bukaan Dhakhliga yar uu dhacay ama haddii kale la joojiyay.
4. Bukaan Dhakhliga yar (marka laga reebo Bukaanka Dhakhliga yar ee Daryeelka Ilkaha helaaya) oo leh MassHealth MAGI ama Dakhliga La xisaabin Karo ee Qoyska ku jira Dhibaatada Caafimaadka (sida lagu cadeeyay 101 CMR 613.04(2)) oo ku jira 400% heerka FPL ayaa laga dhaafayaa talaabooyinka lacag aruurinta ee qayb kamid ah biilka ka badan lacagta laga jaro Bukaanka Dhakhliga yar, waxaana laga qaadi karaa qaybta ugasoo aada caumiska iyo lacagaha caymiska ka goosanaayo ee waafaqsan sharciyada gobalka.  Isbitaalku wuxuu sii wadi karaa inuu ka dalbado Qarashka Adeegyada Bukaan Dhakhliga yar ee la siiyay kahor intaan la go'aamin inay yihiin Bukaan Dhakhliga yar, laakiin kaliya kadib marka aqoonsigan Bukaan Dhakhliga yar uu dhacay ama haddii kale la joojiyay.
5. Bukaan u qalma Dhibaatada Caafimaadka, marka laga eego cadadka biilka oo kabadan cadadka lagu siiyo caawimaada Dhibaatada Caafimaadka sida lagu xisaabshay xeerarka arintan quseeya ee Health Safety Net). Haddii codsiga lacageed ee horay loo codsaday inuu yahay Dayn Xumatay oo Degdeg ah uu noqdo mid u qalma qarashka lagu bixiyo Dhibaatada Caafimaadka ee haayada Health Safety Net, Isbitaalku wuxuu joojin doonaa talaabada qarash aruurinta ee ku aadan adeegyadaas.
6. Bukaanka Isbitaalka ama Urur uu ka caawinaayay codsashada caawimaada Dhibaatada Caafimaadka, haddii Isbitaalka ama Ururku, sida ku haboon, ku fashilmo gudbinta codsiga bukaanka shan (5) maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood marka codsiga la buuxsho kadib uuna keeno dhammaan dukumiintiyada loo baahnaa bukaanka/Damiinka uuna u keeno Isbitaalka ama Mu'asasada, kaasoo quseeya qarashaad kasta oo lagu heli kara lacagaha Dhibaatada Caafimaadka haddii codsiga la gudbin lahaa oo la aqbali lahaa.

Bukaannada Dhakhliga yar lagama reebin talaabooyinka dayn aruurinta ee adeegyada aan ahayn kuwa Kaalmada U qalma kuwaasoo lagu baxshay codsiga bukaanka/Damiinka uuna bukaanku/damiinku aqbalay inay yihiin kuwo macquul ah; marka la xaqiijiyo in Bukaannada Dhakhliga yar aan laga qaadi doonin biilka codsiyada la xidhiidha ciladaha caafimaadka ama codsiyada ay diiday shirkada caymiska rasmiga ah ee bukaanka sabab la xidhiidha cilad maamul ama biil oo Isbitaalku sameeyay. Isbitaalku waa inuu helaa ogolaanshaha qoran ee bukaanka ama Damiinka si looga qaado qarashka adeegyadaas.

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

Marka bukaanku codsado, Isbitaalka ama Mu'asasadaas, sida haboon, wuxuu ka codsan karaa lacagta Bukaanka Dhakhliga yar si loogu sahlo bukaanka noocaas ah inuu buuxsho lacagta qasabka ah ee halka mar lagu jarto caymiska CommonHealth.

**C. Dalabka Hore ee biilka:** Marka laga reebo bukaannada laga dhaafay talaabada qarash aruurinta sida kor lagu sheegay, Isbitaalku wuxuu biilka hore u gudbinayaa bukaanka/Wakiilka ama qolada sadexaad ee la sheegay inay qarashka dhiibayso.

**D. Dabagalka Shaqada Dayn Aruurinta** Isbitaalku wuxuu adeegsanaayaa wakaalado madax banaan si ay u fuliyaan shaqada dayn aruurinta ee lacagaha bukaanku iska dhiibayaan, wuxuu waafajinayaa wakaalad kasta oo noocaas ah xeerarka ku cad Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ee Isbitaalka uga dagsan talaabooyinka qarash aruurinta ee ka bilaabanaaya waqti ilaa waqti kale, kuwaasoo ay tahay inay waafaqsanaadaan Xeerka Daynta iyo Lacag Aruurinta. Dhammaan kontooyinka bukaanka aan laga dhaafayn talaabada lacag aruurinta ayaa la waafajin doonaa shaqada lacag aruurinta ee joogtada ah waxayna helayaan ugu yaraan sadex talaabo oo qarash aruurin ah. Talaabooyinka qarash aruurinta ee uu Isbitaalka qaadaayo ama wakiilkiisu qaadaayo waxaa ku jiri kara, laakiin kuma xadidna, arimaha soo socda:

1. Biilka hore, ee laga dalbaday bukaanka/Damiinka iyo qolo kale oo kasta ama qolyo masuul ka ah waajibaadka dhaqaale ee bukaanka;
2. Bayaanada dheeraadka ah ee lacag dalbashada (oo la diraayo 30 maalmood ba mar kadib marka la go'aansho in qofku masuul ka yahay bixinta qarashkiisa);
3. Waraaq dabagal ah (oo lagu diraayo boostada heerka koobaad ama boosto sharciyaysan);
4. Wicitaannada taleefanka, ogaysiisyada elektarooniga ah (tusaale, lagu diro ciwaanka iimeelka), ogaysiisyada kulanka tooska;
5. Ogaysiiska kama danbaysta ah ee baaqiga ka badan $1,000 (ee lagu diray boostada sharciga ah); iyo
6. Kullanada lala qaadanaayo Wakiilka ama cidda kale ee qarashka bixinaysa.

Isbitaalku wuxuu haysanayaa kaydka bukaan kasta oo ay ku jiraan dukumiintiyada dadaalada lacag aruurinta ee Isbitaalka, ayna ku jiraan koobiyada biilasha, waraaqaha dabagalka ah, warbixinada xidhiidhada taleefanka iyo kan tooska ah iyo dadaalada kale ee la sameeyay.

**E. Boostada Lasoo Ceshay:** Kootooyinka boostadooda lasoo cesho ayaa la baari doonaa si loo raadsho bukaanka iyo/ama Wakiilka. Dadaalada lagu raadinaayo guriga uu hadda dagan yahay bukaanka waxaa ku jiri doona: ugu yaraan:

1. In dib loo fiirsho dhammaan diiwaannada la hayo iyo balamaha si loo go'aansho in guriga ugu danbeeyay ee bukaanka uu dukumiintiyada ku jiro;
2. In lala xidhiidho qaraabo ama saaxibo kasta oo la garanaayo; iyo
3. In la fiirsho diiwaankiisa taleefanka ee hadda.

Isbitaalka ayaa la xariiri kara wakaalado, adeeg bixiyaal iyo dhakhaatiirta kale ee isbitaalka ka baxsan si loo qaado talaabooyin dheeraad ah oo lagu raadinaayo bukaanka. Dadaalada lagu raadinaayo qolada masuulka ah waajibaadka ama

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

ciwaanka saxda ah ee biilasha loosoo ceshay sabab la xidhiidha "ciwaan khaldan" ama "ciwaan aan la heli karin" ayaa la qori doonaa.

**F. Dalaafka Dhaqaale:** Marka la helo ogaysiiska sharci ee dalaafka dhaqaale ee bukaanka/wakiilka, dhammaan shaqada qarash aruurinta ayaa la joojinayaa kootadana isbadal ayaa lagu samaynayaa. Kiisaska dalaafka dhaqaale ayaan u qalmin loona gudbin doonin caawimaada Health Safety Net.

**G. Go'aaminta Daynta Xumaatay:** Kadib markay fashilmaan dadaalada qarash aruurinta ee macquulka ah inay soo xareeyaan lacagta qarashaadka bukaanka lagu leeyahay, baaqiga lagu leeyahay qofka ayaa loo aqoonsan karaa dayn xumaatay si waafaqsan xeerkaan Daynta iyo Lacag Aruurinta iyo xeerar kasta oo quseeya waaxda dhaqaalaha (taasoo waafaqsanaan doonta Xeerkaan Daynta iyo Aruurinta Daynta); marka la xaqiijiyo in Waajibaadka Dhaqaale ee Bukaanka aysan ku jirin sababaha loo cuskaday Daynta Xumaatay ee soo gudbinta sheegashada ku cad Health Safety Net.

<u>Shuruudaha Go'aaminta Daynta Xumaatay ee Degdega ah:</u>: Marka la helo xogta si kooto loogu aqoonsado dayn xumaatay waqti ka mid ah inta lagu jiro shaqada raadinta daynta, kootada ayaa si degdeg ah loogu aqoonsan karaa dayn xumaatay ayadoon la qaadin wax talaabo lacag aruurin dheeraad ah. Waxaa qaybtaan ku jira arimaha soo socda:

1. Iskuday aan lagu guulaysan oo lagu aqoonsanaayo sababta keentay in boostada lasoo celiyay ee aan gaarin qofkii loo diray ay u gaari wayday qofkii loo diray. Kootooyinka aan boostadu gaari karin ama "ciwaankoodu qaldan yahay" ayaa loo aqoonsanayaa dabagal uu samaynaayo Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka waxaana la baarayaa ciwaanka/xidhiidhka saxda ah kahor intaan koontada la galin aqoonsiga dayn xumaatay.
2. Iskuday guul daraystay oo lagu raadinaayay nambarka taleefanka ee shaqaynaaya kadib markii uu khadka ka baxay taleefanka bukaanka/Wakiilka.
3. Ogaysiiska qoraalka ah ama hadalka ah ee ah inuusan bukaanku/Wakiilku doonayn ama diidaayo dhiibista qarashka.
4. Helitaanka ogaysiiska rasmiga ah ee ka yimaada shirkada caymiska ama lacag bixiye kale ay ku shegayso in gunnooyinka la siiyay qofka caymislaha ah, lana sameeyay ugu yaraan hal iskuday laga sameeyay sidii loola xariiri lahaa bukaanka/Wakiilka kadib markii xogtaas laga helay shirkada caymiska/ama cid kale oo lacagta masuul ka ah.

**H. Adeegyada Ka dalbashada Biilka Daynta Xumaatay ee degdega ah Health Safety Net:** Marka lagu daro talaabooyinka aruurinta daynta ee kor lagu xusay, Isbitaalku wuxuu waraaq u dirayaa bukaan kasta (marka laga reebo bukaannada ogaysiisyadood noqdeen "kuwa aan la helin" ama "ciwaanka gurigu khaldan yahay") oo lagu leeyahay baaqi ka badan $1,000 ee Adeegyada xaaladda deg dega ah iyo kuwa la xidhiidha kahor intaan biilka adeegga laga codsan Health Safety Net. Baaqiga lacagta waxaa laga codsanayaa Health Safety Net kaliya kadib marka uu baaqigu jiray asagoon la bixin wax ka badan 120 maalmood laga bilaabo markii la diray ogaysiiskii hore ee biilka. Dadaalada macquulka ah ee dayn aruurinta ee la fuliyo inta lagu jiro mudadaas ayaa lagu qori doonaa diiwaanka dhaqaalaha ee bukaanka. Markay yihiin adeegyo la siiyay bukaan aan caymis lahayn, shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ayaa ka xaqiijinaaya nidaamka Xaqiijinta ee

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

MassHealth, in bukaanku uu ama u qalmin ama uusan codsan MassHealth iyo in bukaanku uusan ahayn Bukaan Dhakhliga yar.

**I. Dadaalada Dayn Aruurinta ee aan Caadiga ahayn iyo Fulinta Sharciga ah:** Caadiyan, Isbitaalku ma qaadaayo "talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta." Talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta waxaa ku jira in daynta laga gado adeeg bixiye kale ama shirkad kale, in xog xun oo qofka ku saabsan loo gudbiyo wakaalada soo gudbisa hufnaanta daynta ee dadka ama laanta daynta, dib u dhigista ama ka diidista, ama ku qasbida inuu qarashka bixiyo kahor intaan loo fidin, Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah sabab la xidhiidha inaan bukaanku bixin mid ama ka badan oo kamid ah biilalka daryeelka mar hore la siyay sida ku cad xeerka Kaalmada Dahqaalaha ee Isbitaalka, damaanad u qaadashada ama la wareegida guriga uu dagan yahay qofku ama gaarigiisa shaqsiga ah, jarashada mushaaraadkiisa, iyo/ama gudbinta dacwad madaniga ah oo qofka ka dhan ah. Go'aan kasta oo lagu fulinaayo talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta ayaa u baahan inay u codeeyaan Gudigga Agaasimayaashu. isbitaalka iyo wakiiladiisa waxaa laga doonayaa inay u muujiyaan Gudigga Agaasimayaasha dadaalada macquulka ah ee la sameeyay si loo go'aansho u qalmida bukaanka caawimaad sida ku cad Xeerka Kaalmada dhaqaalaha kahor intaysan ku talin in la qaado talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta. Talaabooyinka aan Caadiga ahayn ee Dayn Aruurinta lama bilaabaabo ilaa laga gaaro ugu yaraan 120 maalmood laga bilaabo taariikhda Isbitaalku siiyay dalabka biilka koobaad kadib marka isbitaalka laga saaro bukaanka, wuxuuna u baahan yahay muujinta ogaysiiska qoraalka ah ee loo diray bukaanka kuna saabsan helitaanka caawimaad dhaqaale ugu yaraan 30 maalmood kahor intaan talaabada la qaadin. Ogaysiiska qoran ayaa sidoo kale u baahan inuu muujiyo shaqada aan caadiga ahayn ee dayn aruutinta ee Isbitaalku doonaayo inuu bilaabo, iyo sidoo kale taariikhda shaqadaasi bilaabanayso. Marka la qaado talaabooyinka dayn aruurinta oon caadi ahayn, Isbitaalku wuxuu joojin doonaa dhammaan talaabooyinka marka Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha lasoo gudbiyo. Codsiga noocaas ah ayaa furaaya mudada dib u eegista oon ka badnayn 30 maalmood.

**J. Shilalka Gaariyaasha:** Isbitaalku wuxuu gudbinayaa sheegashada qarashka Adeegyada U qalma ee la siiyay Bukaan Dhakhliga yar oo ku dhaawacmay shil gaari kaliya haddii (1) uu baaray in bukaanka, darawalka, iyo/ama mulkiilaha gaarigu uu leeyahay caymiska magdhawga; (2) uu sameeyay dadaal kasta oo uu ku helaayo xogta qarash bixiye kasta oo sadexaad; (3) uu hayo cadaynta dadalaadaas, ayna ku jiraan qorista wicitaannada taleefanka iyo waraaqaha loo diray bukaanka; iyo (4|) marka la heli karo, uu si dhab ah u gudbiyay dalabka qarashka uuna u dray shirkada caymiska magdhawga gaariga. Markay timaado shilalka gaariyaasha iyo dhammaan soo kabista la xidhiidha qarashaadka horay looga dalbaday Health Safety Net, Isbitaalku wuxuu soo sheegayaa lacag kasta oo uu soo ceshtay wuxuuna u sheegayaa Xafiiska Health Safety Net. lacagta la helo ayaa laga jar doonaa lacagta lagu dalbaday Adeegyada Bukaanku U qalmo.

Isbitaalku wuxuu qorayaa shaqada la xidhiidha cadaynta iyo sheegida koonto loo aqoonsaday dayn xumaatay. Maadaama Isbitaalku leeyahay nidaam "kombuyuutar ku shaqeeya" oo lagu hayo xogta bukaan jifka iyo bukaan socodka, qorista shaqada adeegyadaan waxaa lagu hayn karaa nidaamka kumbuyuujtarka ayagoo qoraal isku dhafan ah halkii ay ka ahaan lahaayeen waraaqo.

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

# Xaquuqaha iyo Waajibaadka saaran Bukaanka:

**A.** Isbitaalku wuxuu u sheegayaa bukaannada xaqa ay u leeyihiin:

1. Cofsashada MassHealth, Barnaamijka Kaalmada Qarashka Joogtada ah ee ay maamusho Health Connector, oo ah Caymis Caafimaad oo Aqoonsi leh, go'aaminta Bukaanka Dhakhliga yar iyo Dhibaatada Caafimaadka; iyo
2. Qorshe qarash bixin, sida ku cad Xeerkaan Daynta iyo Qarash Aruurinta iyo sharciyada la xidhiidha ee Xeerarka Health Safety Net, haddii bukaanka loo aqoonsado Bukaan Dhakhliga yar ama uu u qalmo caawimaada Dhibaatada Caafimaadka. **B.** Bukaanka hela Adeegyada uu Uqalmo waa inuu:
   1. Keenaa dhammaan dukumiintiyada laga doonaayo;
   2. Uu u sheegaa MassHealth isbadalo kasta oo ku yimaada MassHealth MAGI ama Dakhliga La xisaabin Karo ee Qoyska ee Dhibaatada Caafimaadka (sida lagu sharaxay Xeerarka Health Safety Net) ama xaalada caymiska, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn dakhliga, dhaxalka, hadiyadaha, deeqaha haayadaha, helitaanka caymis caafimaadka iyo magdhawga qolo sadexaad;
   3. inuu la socdo lacagta laga jaraayo bukaanka uuna u keeno dukumiintiyada Isbitaalka taasoo cadaynaysa in lacagta caymiska goosto la baxshay marka wax ka badan hal qof oo qoyska kamid ah loo aqoonsado Bukaan Dhakhliga yar ama haddii bukaanka ama xubnaha qoysku qaataan Adeegyada U qalma oo uu bixiyo wax ka badan hal adeeg bixiye; iyo
   4. Inuu u sheego Xafiiska Health Safety Net ama Wakaalada MassHealth marka bukaanku galo shil, ama uu la ildaran yahay xanuun ama dhaawac, ama khasaaro keeni kara dacwad maxkamadeed ama sheegasho caymis. Bukaanku waa inuu:

a. dirsadaa sheegashada magdhawga, haddii la heli karo; iyo

b. waa inuu aqbalaa dhammaan shuruudaha ku qoran M.G.L. c. 118E, ayna ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn:

(1) siinta Health Safety Net fasax ay ku raadiso cadadka lacagta u dhiganta qarashka Health Safety Net ee laga helo dacwadaha sheegasho kasta ama dacwad kasta oo ka dhan ah qolo sadexaad.

(2) xog ka bixinta sheegashada ama dacwad kasta oo kale, uuna si buuxda ula shaqeeyo Xafiiska Health Safety Net ama wakiilkiisa, ilaa in Xafiiska Health Safety Net go'aamiyo maahee inaan wada shaqayntu ahayn maslaxada koobaad, ama keenayso dhibaato wayn ama naafo xun, oo ku dhacda bukaanka;

(3) u sheegida Xafiiska Health Safety Net ama wakaalada MassHealth, si qoraal ah 10 maalmood gudahood gudbinta sheegasho kasta, dacwad madani ah, ama dacwad kale; iyo

(4) dib u bixinta lacagta Health Safety Net kadib markuu lacag ka helo qolo sadexaad ee dhammaan Adeegyada U qalma ee la baxshay waqtiga ama kadib shilka ama dhacdada kale kadib markuu noqday Badbaadada bulshad sababo la xidhiidha qarashka Health

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

Safety Net, kaliya qarashka laga bixiyo Health Safety Net ee lagu baxshay shilka ama dhacdada kale ayaa dib loo dhiibayaa.

## Daabacaada/Helitaanka Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta, Liiska Adeeg Bixiyaasha Isbitaalka Xidhiidhka laleh, Codsiyada Biilka iyo Aqbalaada Kaalmada Dhaqaalaha/Waraaqaha Diidmada, Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha iyo Xogta Kooban ee Luuqada Fudud ku qoran, Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, iyo Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka

A. Bukaannada, Wakiillada iyo xubnaha kale ee dadwaynaha ayaa heli kara koobiga Xeerkaan Daynta iyo Aruurinta Daynta, Liiska Adeeg Bixiyaasha Isbitaalka Xidhiidhka laleh, Sanbalka Codsiyada Biilka iyo Aqbalaada Kaalmada Dhaqaalaha/Waraaqaha Diidmada, Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha iyo Xogta Kooban ee Luuqada Fudud ku qoran, Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, iyo Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka oo si bilaash ah loogu siinaayo mid kamid ah qaababka soo socda:

1. Daabacaada Interneetka: Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta iyo dukumiintiyada kale ayaa laga heli karaa barta onlaynka **www.childrenshospital.org/financialassistance**.

2. Si toos ah: Koobiyada waraaqaha ah ee (i) Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta Isbitaalka. (ii) Liisla Adeeg Bixiyaasha Isbitaalka Xidhiidhka laleh, (iii) Koobiyada Codsiyada Biilka iyo Aqbalaada Kaalmada Dhaqaalaha/Waraaqaha Diidmada, (iv) Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha iyo Xogta Kooban ee Luuqada Fudud ku qoran, (v) Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka, iyo (vi) Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn ayaa laga heli karaa xarunta Isbitaalka oo ku taala 300 Longwood Avenue, Boston, MA, Farley Building room 160.
3. Iimayl ahaan: Dadwaynuhu waxay sidoo kale codsan karaan in nuqulada dukumiintiyadaan ay ku helaan boostada ayagoo wacaaya Taageerada Adeegyada Macmiilka ee Dhaqaalaha Bukaanka oo laga heli karo (617)-355-3397 iyo/ama Talo Bixinta Dhaqaalaha ee Bukaanka 617-355-7201.

B. Turjumaadaha luuqadda shisheeya ee Xeerkaan Daynta iyo Aruurinta Daynta, Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Xogta Luuqada Fudud ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, Xeerka Kaalmada Bukaanka aan Caymiska Haysan iyo Xisaabinta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ayaa lagu heli karaa luuqado kaladuwan si loo caawiyo dadka aan si fiican u aqoon Ingiriiska.

C. Isgaarsiinada Xarunta: Isbitaalku wuxuu samayn doonaa dadaalo si uu u sheego xeerarkiisa Daynta iyo Aruurinta Daynta asagoo adeegsanaaya qaabab kaladuwan.

1. Boorar ayaa lagu dhajin doonaa qaybaha bukaan jiifka, xarumaha dhakhtarka, iyo aaga qorista/diiwaan gelinta, aagaga la xidhiidha

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

helitaanka caawimaad dhaqaale iyo Xeerarka Daynta iyo Aruurinta Daynta.

2. Boorarka bulshada iyo qaababka kale ee sida macquulka ah loo jaan gooyay soo jiidashada dareenka dadka isbitaalka yimaada ayaa si muuqata loogusoo dhajinayaa meelo kaladuwan dhammaan Isbitaalka, ayna lu jiraan, si aan xadidnayn, qaybta bukaan jiifka, caafimaadka iyo meelaha la dhigo/laga qoro dadka xaalada degdega ah ku jira.
3. Koobiyada Xeerkaan Daynta iyo Aruurinta Daynta ayaa la siin doonaa dhammaan bukaannada midkood waqtiga diiwaan galinta ama ayadoo qayb ka ah hanaanka isbitaal ka saarida.

# Dukumiintiyada Dheeraadka ah/La xidhiidha, Xeerarka iyo Barnaamijyada

1. Liiska Adeeg Bixiyaasha Isbitaalka Xidhiidhka laleh
2. Sanbalada dukumiintiga lacag dalbashada iyo waraaqaha aqbalaada/diidmada caawimaada dhaqaalaha
3. Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha
4. Xogta kooban ee Luuqada Fudud Ku qoran ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha
5. Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha
6. Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn
7. Barnaamijyada Kaalmada Dhaqaalaha ee Bukaanka Caalamiga ah

# Qaybaha Dukumiintiga

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Cinwaanka** | Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta | | |
| **Qoraayaasha** | Agaasimaha Canshuurta iyo Ku dhaqanka Xeerka Dhaqaalaha | **Taariikhda uu Dhaqan galaayo** | 9/30/2016 |
| **Waxaa dib u Eegay/ Saxay** | Gudoomiye ku xigeenka, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, Boston Children's Hospital<br>Madaxa Waaxda Dhaqaalaha, Boston Children's Hospital<br>Mudane. Madaxwayne Ku xigeenka Sare iyo La taliyaha Guud, Boston Children's Hospital | **Taariikhaha Dib loo Eegay/ saxay:** | 12/7/2021<br>12/10/2021 |
| **Waxaa ansixiyay** | 12/20/2021<br>Gudigga Agaasimayaasha ee Boston Children's Hospital | **Effective Date** | 1/1/2022 |

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin